

Degdeg! Barashada af noorwiiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah

Xuqqa barashada af noorwiiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah

Ogolaanshaha deggenaanshahaaga Noorwey ayaa wuxuu xaq kuu siinaysaa i sugayn 300 oo saacadood oo ah barrida

- Af noorwiiijiga(250 saacadood), iyo
- Culuunta bulshada (50 saacadood)

Waxbariddu waa bilaash mudo sedex sano ah

- Laga bilaabo markii lagu siiyay ogolaansho deggeaan, ama
- Laga bilaabo markaad timid Noorwey adoo wata ogolaansho deggeaan oo aan dhicin

Ogow! Hadaadan bilaabin, ama aadan ku dhameynin waxbarashada sadexdaa sano gudohooda, waa inaad adiga iskabixisaa waxbarashada.

Waajib ah barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada

Waa waajib ku saaran inaad dhameysato 300 oo saacadood oo ah barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada, si lagu siiyo hadaad codsato

- ogolaansho deggeaansho oo daa'im ah, iyo/ama
- jinsiyad

Waajibaadkan kuma khusseyo hadaad jirto 55 ama aad ka weyntahay xiliga aad codsiga soo gudbineyso.

Waxaad codsankartaa in lagaa qaado waajibaadka waxbarida hadaad

- Caddeyn karto inaad u leedahay aqoon kugu filan luuqada noorwiiijiga ama tan saamiga ah, ama
- hadey jirto xaalad gaara oo caafimaad ama sababo kale oo adkeynaya waxbarashada.

Warbixin faa'iido leh

Waa inaad adiga la xiriirtaa goobta waxbarashada dadka waaweyn ee gobolka aad ka diwaangashantahay, si aad u codsato waxbarashada, ama hadaad dooneyso inaad codsato in lagaa qaado waajibka waxbarashadaas. Haddad qabtid su'aal ama u baahanahay warbixun ku saabsan waqtiyada kama dambeynta ah iyo xuquuqaha, la xiriir goobta waxbarashada dadka waaweyn

Waxaad sidoo kale warbixin ka heli kartaa shabakadaha; www.imdi.no iyo www.udi.no